



Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WAR-SAXAAFADEED 018/2009

SRSGa oo ku baaqay in kaalmo deg-deg ah oo toos ah lagu deeqo si loo yareeyo dhibaatada iyo macluulka ka jira Soomaaliya

Nayroobi, 14 May 2009 - Ergayga Gaarka ah ee Qaramadda Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Soomaalia, Ahmedou Ould-Abdallah ayaa ku eedeeyay raga xag-jirayaasha ah ee weerarka ku qaaday Muqdisho in ay si toos ah masuul uga yihiin dhibaatada hadda haysata kumananka rayidka ah ee Soomaaliyeed.

‘Xag-jirayaasha Soomaaliyeed iyo saaxiibdooda ajaaniibta ah ayaa billaabay dagaalkan oogu dambeeyay oo sababay dhimashada iyo bara- kaca dadka caadiga ah ee Soomaliyeed- kuwaas oo intooda badani ay hadda dhow ku soo noqday guryahooda ayaga oo rajaynaya in ay billaaban nolal.’ Ayuu yiri Mudane Ould-Abdallah. “Isku dayga kooxdan xagjirka ah ee ku aadan in ay awoodda ku qabsadaan, waxay si toos ah u caddaynaysaa in aysan wax xurmo ah u haynin walaalahooda waxba aan galabsan ee muslimiitna ah isuguna jira rag iyo haween.

Dada Soomaaliyeed waxay u baahnaayeen kaalmo deg-deg ah waxayna oo gu baaqeen bulshada caalamka ah in ay u gargaarto.

“Waxaan ugu baaqayaa wadamada ay khusayso in ay si deg-deg ah u gu howlgalaan una fidiyaan kaalmo toos ah xukuumadda Soomaaliyeed, si heer labadda dowlo ah-bilateral’, ayuu yiri Muddane Ould-Abdallah. “Mar labaad waxaa la qalibay nolashii dadkii rayidka ahaa, waxaana rogay niman dagaalyahan ah oo aan wax-dan ah ka laheen in ay kaalmeeyaan dadkooda. Dadka rayidka ah waxa ay u baahanyihiin kaalmo aasaasi ah sida biyo nadiifah, daawo, bustooyin, iyo hoy ay galaan, waxayna u baahanyihiin hadda.

“Dadka Soomaaliyeed waxay ku qanacsanyihiin in oogu dambeenta ay dhammandoonto qaska iyo deganansho laaanta aan loo baahneen ee labataan kii sanno ee la soo dhaafay. Nasiib daro, nimanka xag-jirayaasha ah oo ayaga naftoodaba kala qaybsan, ayaa doonaya in ay wadanka did ugu celiyaan dhiigii ladaadin jiray sannadihii 1990 yadii. Hadaba, bulshada caalamka way cadaysay in aan arrintaas oo kale gebi ahaanba aan la ogolaanaynin.

Wixii war dheeraad ah fadlan la xiriir: Susannah Price / Donna Cusumano,
Public Information Officers, UN Political Office for Somalia (Nairobi, Kenya)

Tel: +254 20 762 7132 / 7133 or +254 733902020 / 737400133

Fadlan booqo: www.UN-Somalia.org